

Is-tijaabi - Miyaad ka mid noqon kartaa Ururka habeen Guureynta Nabadeed (Night Raven)?

Haa Maya

- Ma tahay qof da'adiisu u dhaxeyso 18 iyo 80?
- Ma tahay qof dadka daryeela?
- Fikrad wanaagsan maka aaminsantahay aadanaha?
- Miyaad leedahay dareen iyo garasho guud?
- Ma jecesahay hawo nadiif ah iyo inaad sameyso jimicsi?
- Ma heleysaa laba ama in ka badan oo Jimco mashquul la'aan ah ama Sabti inta lagu guda jiro sanadka?

Afar iyo in kabadan oo ogolaansho ah?
Waxaad tahay qofka ugu haboon inuu ka mid noqdo Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Raven)!

Xubinta Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Raven) waa qof wayn oo mas'uul ah oo leh dareen iyo garasho guud oo fikrad wanaagsan ka aaminsan aadanaha.

Fa'idada ugu weyn ee Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Ravens) waa in qof walba uu xubin ka noqon karo Ururka Night Raven!

Waxaan mar walba u baahannahay xubno badan ee Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Ravens) sababtoo ah waxaa jira baahi weyn oo loo qabo dadka daryeela dadka kale!

Haye Ku soo biir Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Ravens)!



Gacan ka geysanaya in ay waddooyinka noqdaan ammaan tan iyo ilaa 1990kii

MACLUUMAADKA XIRIIRKA

Cinwaanka xafiiska:
Storgata 28, inng. Lybekkergata
Taleefanka: +47 23 00 21 20
limeylka: post@natteravnene.no
www.facebook.com/natteravnene



Ujeedada Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Ravens):

- In laga dhigo jidadka iyo waddooyinka kuwo ammaan u ah dhammaan kooxaha da'a kasta ah
- In loo ogolaado joogitaanka dadka waaweyn si ay u yereeyaan dhibaatada daroogada, rabshada iyo kharribaadda
- In wacya gelin laga sameeyo xaqiqda ah in ay tahay dabiici in la soo sheego falal dambiyeedka halista ah
- In la sameeyo xiriir dabiici ah oo u dhaxeeyo dhalinyarada iyo dadka wawayn ee aan darooga-da isticmaalin

Xubnaha Ururka Habeen Gureynta Nabadeed (Night Ravens) waa in:

- Uu ahaadaa mid la gaari karo
- Aynaan u dhaqmin sida qolada sharciga gacantooda ku fuliya ama isticmaala nooc kasta oo awood ah
- Ay fikrad wanaagsan ka qabaan aadanaha
- Ay lahaadaan awood ay si fiican ugu fekeraan marka ay kuwa kale waayaan awoodaas
- Iisticmaalaan xirfadaha isgaadhsiinta hadalka ah si loo xallijo khilaafaadka

Ma daneynaysaa inaad qeyb ka noqoto Ururka Habeen Guurenta Nabadeed (Night Raven)?



Maanta nagala soo xiriir!

Xaqiqooyinka ku saabsan Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Ravens):

Ururka habeen guurenta nabadeed (Night Ravens) waxaa uu ka kooban yahay waalidiin, dadka doobka ah, dadka hawl gabka ah, dhalinyarada – dhamaan noocyada kala duwan ee dadka isku danta ah: Waxaa ay daneeyaan oo ay daryeelaan bulshada.

Kooxo badan ayaa lagu abaabulaa dugsiyada dhalinyarada, degmooyinka ama xarumaha mutadawacnimada.

Ururka habeen guurenyta nabadeed (Night Ravens) waa urur iskaa wax u qabso ah oo ka kooban dadka waawayn kuwaas oo kuwareegaa agagaarka degaanka iyagoo kooxyo yar yar ah fiidki iyo habeenkii.

Shaqada xubnaha Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Ravens) waa in ay yihiin kuwo la arki karo oo la heli karo, iyada oo ku saleysan fikradda ah in taasi nafteeda ka caawiso yareynta rabshada iyo kharribaadda.

Waxaan sidoo kale caawinnaa dadka, sabab kasta ha noqotee, aan awoodin inay is-daryeelaan, anagoo dalbaneyna caawimo xirfad leh haddii loo baahdo.

Uma baahnid inaad taqaano karatee (Dagala lugaha iyo gacmaha) si aad qeyb uga noqoto Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Raven).

Uma baahnid inaad lahaatid awood ah in aad kor u qaadiid culeys 10 kg halkii marba. Bedelkaasna, waxaan isticmaalnaa hadal.

Xubnaha Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Ravens) marna ma dhengalaan xaaladaha rabshada-ha, laakiin way indha indheeyaan oo Waxaa ay wacaan booliiska haddii loo baahdo.

Wax lacag ah laguguma siin doono, laakiin waxaad wax badan ka baran doontaa magaalada iyo jawiga degaan-kaaga, waxaad heli doontaa hawo nadiif ah iyo aqoon cusub - waana mucjiso damiirkha toosisa.

Uma baahnid inaad taqaano gargaarka deg dega ah sababtoo ah anaga ayaa ku bari doona.

Ururka Habeen Guureynta Nabadeed (Night Ravens) waxay bixiyaan koorsooyin gargaarka deg dega ah oo bilaash ah oo loogu talagalay dhammaan dadka lugeeyayaasha ee Oslo iyo Akershus.